

Liistadayada sugitaanka guryeyntayadu way furan tahay!



Liisaska sugitaanka guryaynta dakhliga hooseeya ee Tacoma ayaa furmi doona Noofeembar 14, 2024

Tacoma Housing Authority waxay kusoo casuumayaan dadka u qalma inay dalbadaan barnaamijkeeda guryaha qiimaha jaban. Waxaanu bixinaa laba nooc oo guud oo kaalmo guryayn ah: guryo la awoodo oo kiro ah, ama fagtuur dadku ay kirada iskaga bixiyaan Tacoma. Waxaan aqbali doonaa codsiyada bilaabma:

9 subaxnimo Khamiis, Noofambar 14-keeda

Waa kuwan waxa aad u Baahan tahay inaad Codsato

1. Magaca buuxa iyo macluumaadka aasaasiga ah ee dhammaan xubnaha qoyskaaga.
2. Lambarada Bulshada ee dadka waaweyn (18 ama ka weyn) ee haysta mid.
3. Dakhliga sannadlaha ah ee qoyska oo dhan.
4. Ciwaanka iimaylka ee shaqaynaya. Waxaad email ka samayn kartaa gmail.com ama outlook.com.
5. Koonto ka diiwaangashan THA's (Tacoma Housing Authority) RentCafe ee websaytka adeeg.



Igu sawir
kaameeradaada
taleefanka ama Ab-ka
Koodhka QR

Ka codso: [Tacomahousing.org/waitlist](https://tacomahousing.org/waitlist)

Si loo helo degaan macquul ah iyo kaalmada luuqadda, fadlan nagala soo xiriir barta
(253) 207-4400 ama iimayl u dir waitlist@tacomahousing.org.

Su'aalaha Inta badan La iswaydiiyo

Xaq ma u leeyahay in aan codsado?

Qoysaska dakhligoodu yar yahay (eeg xadka dakhliga ee hoose) oo dhan oo baaxad leh ayaa xaq u leh inay codsadaan liistada sugitaanka.

Tirada Dadka Qoyskaaga

1	2	3	4	5	6	7	8
\$40,550	\$46,350	\$52,150	\$57,900	\$62,550	\$67,200	\$71,800	\$76,450

Ma inaan ku noolaado Tacoma si aan u codsado?

Lambarka

Sidee iyo goorma ayaan dalbanayaa?

Si aad u codsato liistada sugitaanka, waxaad u baahan doontaa inaad samaysato koontada [websaytka codsadhaha](#). Waxaad u baahan tahay ciwaanka iimaylka si aad isu-diiwaangaliso oo aad u samaysato koontada. Kadib iska diiwaangalinta Websaytka Codsadhaha waxaad codsan kartaa liisaskayada sugitaanka laga bilaabo Noofeembar 14, 2024.

Waa midkee liistada sugitaanka ee aan codsan karo?

THA waxay leedahay sadex liisto sugitaan oo qof kastaa codsan karo:

- Liistada sugitaanka ee doorashada Kaararka Guriyaynta waxaa loogu talagalay qoysaska jecel foojarka inay guri ka helaan suuqa kirada gaarka ah.
- Liistada sugitaanka guriga qoyska waxaa loogu talagalay qoysaska doonaya inay codsadaan unug ku yaal guryahan soo socda ee THA: Bay Terrace, Bergerson Terrance, Dixon Village, Hillside Terrace, Salishan, iyo the Rise marka la gaaro 19ka.
- Liistada Sugitaanka Guryaha Dadka Waayeelka/Naafada waxaa loogu talagalay qoysaska u qalma waayeel ama naafada oo doonaya inay degaan guryahan soo socda: 6th Avenue Apartments, E.B. Wilson Apartments, Fawcett Apartments, G Street Apartments, K Street Apartments, Ludwig Apartments, iyo Wright Street Apartments. Fadlan ogaw: Guryaha dadka waayeelka/Naafada waxay leeyihiin kaliya 1 qol ah.

Sidee ayaan ku ogaan karaa hadii aan u qalmo guriga Waayeelka/Naafada ah?

Qoyska waayeelku madax u yahay, xaaskiisu, la-hogaamiyaha, ama xubinta keligii ah ay tahay 62 jir ama ka wayn. Qoyska naafada ahi waa kan madaxa, xaaska, madaxa la wadaaga, ama xubinta keligii ah uu yahay qof naafada ah, kaas oo lagu xaqiijiyo ururinta Caymiska Naafada ee Lambarka Bulshada (Social Security Disability Insurance, SSDI) ama Shahaadada Naafanimada Dhakhtarka. U qalmitaanka waxaa la xaqiijin doonaa marka lagaa doorto liistada sugitaanka.

Sidee ayaan ku ogaan karaa hadii aan ku jiro liiska sugitaanka?

Markaad gasho Websaytka Codsadhaha, waxaad arki doontaa qeyb ku calaamadaysan "Xaalada Liistada Sugitaanka (Waiting List Status)." Riix qeybtaas si aad u aragto liiska sugitaanka ee aad codsatay iyo haddii aad ku jirto "Liistada (On List)" ama laga saaray. Codsadayaasha waxaa laga saaray liiska sugitaanka haddii aysan ka jawaabin isgaarsiinta THA ama aysan dhameystirin hubinta khadka tooska ah ee bilaha ah si ay u xaqiijiyaan danaynta ay u qabaan ka sii mid ahaanshiyaha liistada sugitaanka iyada oo loo marayo Save My Spot.

Wax bada Ka Ogaw: [Tacomahousing.org/WaitlistFAQ](https://tacomahousing.org/WaitlistFAQ)